

DUMARKU WAA MADHAAFAAN



Adobe Stock / madiwaso

Diktet er skrevet av Ahmed Aw Gedi i 1995. Diktet handler om kvinnesoppgaver i samfunnet. Han bevisgjør at livet er meningsløst uten kvinne, han anbefaler at dem bør respekteres høyt.

Maan sadan waxa triyey abwaanAxmed Aw Geedi taariikhdu markay ahayd 1995tii.Jiiftadan waxa uu abwaanku si dareen cad ah innoogu sharraxayaa in dumarku kaalin muuqata ay kaga jiraan bulshada dhexdeeda, la'aantoodna aanay suurtoowdeen noloshu. Dumarku waa laf-dhabarta bulshada, xagga dhaqanka iyo anuquutahaba, waxaanu abwaanku maansadan si miisaan leh, inoogu hugotusaale ynayaa waxqabadka haweenku in uu yahay ma dhaafaan. Wāxa ay maansadu si qiimo leh u qiravsaa, kartida, aqoonta, hufnaanta iyo xaq dhawrka ay haweenku mudanyihiin. Dhanka kale waxa uu abwaanku xasuusan yahay in waxa rag is dhaafiyaa ay dumar yihiin, sidaa daraadeed waxa uu ku ducaysanayaa in uu Eebbe siiyo gabadhii uu ku degi lahaa.

Haween maxaan ku diidaa

Ama kaga durkaa tolow?

Dikt om kvinner på somali

Sowtay doraad galab

Anigoo itaal daran

Dabka ii shideenee

Ina soo dugsiyayeen

Haween maxaan ku diidaa

Ama kaga durkaa tolow?

Sowtay laf duudkiyo

Dusha sare i saareen

Dhabarkii dalooshamay

Cududuhuna daaleen

Haween maxaan ku diidaa

Ama kaga durkaa tolow?

Sawtay daleeliyo

Diif iyo lalleemiyo

Dacas iiga dhaasheen

Sareedana i daajeen

Haween maxaan ku diidaa

Ama kaga durkaa tolow?

Sowtay gabbaan dihin

Dikt om kvinner på somali

Intey doobi qaateen

Dabeed ii gobsheeyeen

Buqul iiga duugeen

Dunji dhalanka waayaha

Hayaanadii isdaba joog

Wixii daal la soo maray

Dadaal kuu rag soo galay

Dumar baa kabaayoo

La duduucay hawshii

Nin kastoo dul qaataba

Dumar baa bar-baarshoo

Nin kastoo dadnimo leba

Dumar baa kabaayoo

Nin kastoo bah deeqaba

Dumar baa kal-kaaloo

Nin kastoo la doortaba

Dumar baa u hiishoo

Nin kastoo hal-dooraba

Dumar baa u liil galay

Haddaan dumar abuurrayn

Dadku may tarmeenoo

Haddaan dumar abuurrayn

Dirba muu jireenoo

Dikt om kvinner på somali

Haddaan dumar abuurrayn

Farac muu durkeenoo

Haddaan dumar abuurrayn

Duug muu hadheenoo

Haddaan dumar abuurrayn

Lama kala dab qaateen

Dugsi laga aflaxo iyo

Waa deris ma dhaafaan

Dunji lagu arooriyo

Dun tafiiran weeyaan

Degel lagu nagaadiyo

Gallad weeye lagu dego

Damal lagu nasanayiyo

Waa deeq Rabbaaniya

Sidee baan u diidaa?

Sidee baan u daayaa?

Sidee baan u deyrshaa?

Sideen uba dagaalaa?

Dumar waa madhaafaan

Iyo duugga noloshee

Allahayaw mid diintiyo

Dikt om kvinner på somali

Ahab taadu deeqdoo

Derejeysa aayaha

Allahayaw mid diiqiyo

Duco waalid sidatoo

Oon loo dar-daar werin

Allahayaw mid deeqloo

U dadaasha samahoo

Oon didinin goolmoon